

Magozwe

Magozwe

- ✎ Lesley Koyi
- 👤 Wiehan de Jager
- 💬 Abdi Muse
- 🗣️ somaliska / svenska
- 📊 nivå 5





Gudaha magaaladda mashquulsan ee Nayroobi, ee ka fog daryeel nolol ee guriga, waxaa ku noolaa koox wiilal ah oo hoy la'aan ah. Waxay soo dhaweeyeen maalin kasta sidii ay u timid. Subax subxaha kamid ah, wiilasha ayaa darimahooda laablaabanayay ka dib ku seexashadi wadada qaboow qarkeeda. Si aay isaga kiciyaan qabowga waxay shiteen dab qashin lagu shiday. Kooxdan wiilasha ah waxaa ka mid ahaa Magozwe. Wuxuu ahaa kan ugu yar.

...

I den stora staden Nairobi, långt ifrån ett tryggt hem, bodde en grupp hemlösa pojkar. De levde dagen som den kom. En morgon packade pojkarna ihop sina mattor efter att ha sovit på den kalla trottoaren. För att värma upp sig gjorde de upp en eld av skräp. En av pojkarna var Magozwe. Han var yngst.



Markii waalidkii Magozwe dhinteen, wuxuu ahaa shan sano jir. Wuxuu aaday adeerkii si uu ula noolaado. Ninkani ma daryeeleyn ilmaha. Ma uusan siin Magozwe cunto ku filan. Wuxuu ka yeelay wiilka in uu qabto shaqo badan oo adag.

...

När Magozwes föräldrar dog var han bara fem år gammal. Han fick bo med sin farbror. Hans farbror brydde sig inte om barnet. Han gav inte Magozwe tillräckligt med mat. Han tvingade pojken att arbeta hårt.



Haddii Magozwe uu ka cawdo ama su'aalo, adeerkiis ayaa garaaci. Markii uu Magozwe weydiistay inuu iskuul aadi karo, adeerkiis ayaa garaacay oo ku yidhi, "Aad ayaad nacas u tahay in aad wax barato." Saddex sano oo loola dhaqmayay Magozwe waa uu ka cararay adeerkii. Wuxuu bilaabay in uu ku noolaado waddada.

...

Om Magozwe klagade eller ifrågasatte så slog hans farbror honom. När Magozwe frågade om man kunde få gå i skolan slog hans farbror honom och sa: "Du är för dum för att lära dig någonting." Efter tre år med denna behandling rymde Magozwe från sin farbror. Han började bo på gatan.



Nolosha waddadu way adkayd, badankoodna wiilasha waxa ay maalin walba la halgamayay si ay cunto u helaan. Mararka qaarkood waa laxiraayay, mararka qaarkood waa la garaacaayay. Markii ay xanuunsadaan, ma jirin cid caawisa. Kooxdu waxay ku tiirsanayd lacagta yar ee ay tuugsiga ku soo helaan, iyo iibinta caagadaha iyo dib-u-warshadaynta kale. Noloshu waxa ahayd mid sii adag sababtoo ah dagaalo lala galo kooxo cadow ah oo rabo in ay maamulaan qeybo kamid ah magaalada.

...


Gatulivet var hårt och de flesta av pojkarna kämpade varje dag med att få mat. Ibland blev de anhållna, ibland blev de slagna. När de var sjuka fanns det ingen som hjälpte dem. Gruppen var beroende av den lilla summa pengar de tjänade på att tigga, och från att sälja plast och annan återvinning. Livet var ännu svårare på grund av bråk med rivaliserande grupper som ville ha kontroll över vissa delar av staden.



Maalin maalmaha ka mid ah markii uu Magozwe fiirinayay weelka qashinka lagurido, wuxuu helay buug sheeko oo gaboobay oo dildilaaacsan. Waxuu ka nadiifiyey wasakhdii waxuuna ku ritay jawankiisa. Maalin walbo malintaa kadib wuxuu soo bixin jiray buugga oo eegi jiray sawirada. Ma uusan aqoonin sida loo akhriyo ereyada.

...

En dag medan Magozwe tittade i sopkorgarna hittade han en gammal barnbok. Han gjorde ren den och la den i sin påse. Han tog fram boken varje dag och tittade på bilderna. Han visste inte hur han skulle läsa orden.



Sawirada waxay sheegi jireen sheeko wiil weynaaday sii u noqdo duuliye. Magozwe wuu maalin riyoon jiray isagoo ah duuliye. Mararka qaar, waxuu niyeysan jiray in uu yahay wiilka sheekada ku jiro.

...

Bilderna berättade om en pojke som växte upp och blev pilot. Magozwe dagdrömde om att bli en pilot. Ibland fantiserade han om att han var pojken i boken.



Waxay ahayd qabow, Magozwe waxa uu markale taagnaa wadada asagoo tuugsanayo. Nin baa xagiisa u soo dhaqaaqay. “Helo, waxaan ahay Thomas, waxaan ka shaqeyaa meel halkan u dhow, oo aad ka heli karto wax aad cunto,” ayuu yiri ninkii. Waxa uu tilmaamay guri jaale ah oo leh saqaf buluug ah leh. “Waxaan rajeynayaa in aad halkaas aadi doonto si aad u hesho cunto?” ayuu weydiiyay. Magozwe wuxuu eegay ninkii, ka dibna guriga. “Waa laga yaabaa,” ayuu yiri, wuuna ka dhaqaaqay.

...


Det var kallt och Magozwe stod vid sidan av vägen och tiggde. En man kom fram till honom. “Hej, jag heter Thomas. Jag arbetar här i närheten på ett ställe där du kan få något att äta,” sa mannen. Han pekade på ett gult hus med blått tak. “Jag hoppas att du går dit och får lite mat?” frågade han. Magozwe tittade på mannen, och sedan på huset. “Kanske”, sa han och gick iväg.



Bilihii ka dambeeyey, wiilashii hooy la'aanta ahaa waxay la qabsadeen araga Thomas meelaha ka dhow. Wuxuu jeclaa in uu la hadlo dadka, gaar ahaan dadka ku nool wadooyinka. Thomas wuxuu dhageystay sheekooyinka nolosha dadka. Waxa uu ahaa mid aad u daneeyo una dulqaato, marnaba ma ahayn mid kibro ama ixtiraam daran. Qaar ka mid ah wiilasha waxay bilaabeen in ay aadaan guriga jaalaha iyo buluuga ah si ay cunto u helaan duhurnimadii.

...

Under månaderna som följde vande de hemlösa pojkarna sig vid att se Thomas. Han tyckte om att prata med människor, speciellt med folk som bodde på gatan. Thomas lyssnade på berättelserna om människors liv. Han var allvarlig och tålmodig, aldrig oartig eller respektlös. Några av pojkarna började gå till det blå-gula huset för att få lunch.



Magozwe wuxuu fadhiyay wadada qarkeeda isaga oo eegaya sawirka buugiisa markuu Thomas soo fadhiistay agtiisa. "Maxay sheekada ku saabsantahay?" ayuu Thomas weyddiiyay. "Waxay ku saabsan tahay wiil yar oo noqday duuliye," ayuu Magozwe ku jawaabay. "Waa maxay magaca wiilka?" ayuu Thomas weyddiiyay. "Ma aqaan, ma aqrin karo," ayuu Magozwe si hoos ah u yidhi.

...

Magozwe satt på trottoarkanten och tittade på bilderna i sin bok när Thomas satte sig bredvid honom. "Vad handlar berättelsen om?" frågade Thomas. "Den handlar om en pojke som blir pilot," svarade Magozwe. "Vad heter pojken?" frågade Thomas. "Jag vet inte, jag kan inte läsa," sa Magozwe tyst.



Markii ay kulmeen, Magozwe wuxuu bilaabay in uu sheekadiisa u sheego Thomas. Waxay ahayd sheekadii adeerkiis iyo sababta uu ooga soo tagay. Thomas lama hadlin wax badan, mana u sheegin Magozwe waxa uu sameyn lahaa, laakiin marwalba wuxuu u dhageystaa si taxadar leh. Mararka qaark way hadli jireen markii ay ku cunaayan guriga leh saqafka buluugga ah.

...

När de lärde känna varandra började Magozwe berätta sin egen historia för Thomas. Den handlade om hans farbror och varför han rymde. Thomas sa inte så mycket, och han talade inte om för Magozwe vad han borde göra. Istället lyssnade han noga. Ibland pratade de när de åt i huset med det blåa taket.



Maalintii tobnaad dhalashada Magozwe wuxuu Thomas siiyey buug sheeko oo cusub. Waxay ahayd sheeko ku saabsan wiil yar oo tuulo joogay oo koray si uu u noqdo ciyaaryahan caan ah. Thomas wuxuu sheekadaas u akhriyey Magozwe marar badan, ilaa hal maalin ayuu yiri, “Waxaan u maleynayaa inay tahay waqtigii aad tagtay dugsiga aadna baratay si aad u akhrido. Maxaad u malaynaysaa?” Thomas wuxuu sharxay inuu ogaa meel ay carruurta joogi karaan, oo aadaan dugsi.

...

Ungefär vid Magozwes tionde födelsedag gav Thomas honom en ny bok. Det var en berättelse om en bypojke som växte upp och blev en berömd fotbollsspelare. Thomas läste berättelsen för Magozwe många gånger tills han en dag sa: ”Jag tror det är dags att du går i skolan och lärde dig att läsa. Vad tror du?” Thomas förklarade att han visste ett ställe där barn kunde bo och gå i skolan.



Magozwe wuxuu ka fakaray meeshan cusub, iyo aadista iskuulka. Maxaa dhacaya haddii uu adeerkiis saxsana oo uu ahaa asaga mid aad u nacas ah inuu wax barto? Maxaa dhacaya haddii ay ku garaacaan meeshan cusub? Wuu cabsaday. "Waxaa laga yaabaa in ay ka wanaagsan tahay inaad ku sii noolaato wadada," ayuu ku fakaray.

...

Magozwe tänkte på det nya stället och om att gå i skolan. Tänk om hans farbror hade rätt och att han var för dum för att lära sig någonting? Tänk om de slog honom på det nya stället? Han var rädd. "Kanske är det bättre att bo på gatan?" tänkte han.



Wuxuu lawadaagay cabsidas Thomas. Muddo ka dib ninkii ayaa ku booriyay wiilka in noloshu ku fiicnaan karto meeshas cusub.

...

Han berättade om sin rädsla för Thomas. Med tiden kunde mannen övertyga pojken om att livet skulle bli bättre på det nya stället.



Oo sidaas daraaddeed Magozwe wuxuu dagay qol guri saqaf cagaaran. Wuxuu qolka la wadaagay laba wiil oo kale. Guud ahaan waxaa jiray toban carruur ah oo ku noolaa gurigaas. Eedo Cissy iyo ninkeeda, seddex eey, bisad, iyo ri duq ah.

...

Och så kom det sig att Magozwe flyttade in i ett rum i ett hus med grönt tak. Han delade rum med två andra pojkar. Allt som allt bodde tio barn i huset, tillsammans med tant Cissy och hennes man, tre hundar, en katt och en gammal get.



Magozwe wuxuu bilaabay dugsiiga, waxayne ahayd mid adag. Waxaa u yaalay wax badan in uu la qabsado. Mararka qaar wuxuu doonayay in uu iska daayo. Laakiin wuxuu ka fekeray duuliyihii iyo ciyaaryahankii kubadda cagta ee buugta sheekooyinka. Sida iyaga oo kale, ma uusan is dhiibin.

...

Magozwe började skolan och det var svårt. Han hade mycket att ta igen. Ibland ville han ge upp. Men han tänkte på piloten och fotbollsspelaren i böckerna. Precis som de tänkte han inte ge upp.



Magozwe wuxuu fadhiyay deyrka gurigii saqafka cagaara, akhrisanayo sheeko buug oo dugsig. Thomas baa u yimid oo soo ag fadhiistay isaga. “Maxay sheekada ku saabsantahy?” waxaa weyddiyay Thomas. “Waxay ku saabsan tahay wiil yar oo macallin noqday,” ayuu yiri Magozwe. “Waa maxay magaca wiilka?” waxaa weyddiyay Thomas. “Magaciisu waa Magozwe,” ayuu yiri Magozwe isaga oo dhoola cadeynaya.

...

Magozwe satt i trädgården till huset med det gröna taket och läste en bok från skolan. Thomas kom och satte sig bredvid honom. “Vad handlar berättelsen om?” frågade Thomas. “Den handlar om en pojke som blir lärare,” svarade Magozwe. “Vad heter pojken?” frågade Thomas. “Han heter Magozwe”, svarade Magozwe med ett leende.



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Magozwe

Magozwe

Skriven av: Lesley Koyi

Illustrerad av: Wiehan de Jager

Översatt av: Abdi Muse (so), Erika Braas (sv)

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons

[Erkännande 4.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).